



Shuruucda Baaddiye (The Countryside Code)

Xushmee – Ilaali – Ku raaxayso

Talo-siin dad-weynaha loogu tala-galay

Haddii ay noqoto tamashlayn yar ama dalxiis gaaban oo nasasho leh ama weliba haddii ay gaarto socod dheer ama tacabur wadnaha si aad uga shaqaysiiso, baaddiyuhu wuxuu kuugu deeqaa fursad kaste si aad u raaxaysatid una nasatid.

Waxaa jira beero baaddiye, xeebo, meelo geeda leh, webiyo iyo kayman, iyo weliba kumaakun mayle (mile) oo ah dariiqyo ay xaq u leeyihiin dad-weynuhu inay maraan iyo waddooyin kale oo calaamadaysan oo aad tegi karto adoo lugaynaya, baaskiil ama faras fuushan. Waxaad weliba socsocon kartaa meelaha baaddiyaha qaarkood oo lugu tilmaamo dhul ballaar ah, sida buuraha, dhulka doog adag leh (moor), dhulka ciidda leh ee geedo badan aan lahayn (heath), taagga aan geedo lahayn (down) iyo dhulka ballaaraan ee lugu nasan karo (common land).

- **Nabad ku joog – hore u sii qorshayso calaamadahana raac**
- **Ganjeellooyinka iyo hantida dadku leeyahay sidaad ku aragtay ku dhaaf**
- **Ilaali geedaha iyo xayawaanka, qashinkaagana guriga u qaado**
- **Eyga aad wadatid si adag u ilaali**
- **Tixgeli dadka kale**

Haddii aad adeegsatid Shuruucaha Baaddiyaha, meel kasto oo aad tagtidba, sida ugu wacan ayaad u xiisayn kartaa waxaana gacan ka dhiiban doontaa ilaalinta baaddiyaha hadda iyo marka la eego facyada mustaqbalka.

Nabad ku joog – hore u sii qorshayso calaamadahana daba raac

Xataa haddii aad meel kuu dhow u baxaysid, waxaa habboon inaad doonato akhbaartii ugu dambeysay ee ku saabsan halkaad tagi kartid iyo waqtigaad tagi



kartid; tusaale ahaan, xuquuqda aad u leedahay inaad meelaha banaanka ah qaarkood tagtid waxaa laga yaabaa inay soo koobmaan inta shaqo ka socoto, sababtuna ay tahay amnigaaga, ama xilliga barbaarinta. Adeegso talo-siinta iyo calaamadaha xaafadda, diyaarna u ahow waxaan la-filanayn.

- Isticmaal maababkii iyo buugaagta higid ee ugu dambeeyay, u soo booqo www.countrysideaccess.gov.uk ama la xiriir xarumaha macluumaadka ee xaafadda.
- Adigaa masuul ka ah nabaddaada iyo ta dadka kale ee aad daryeelaysid, markaas diyaar u ahow inuu jawigu is-beddelo iyo dhacdooyinka kale. U soo booqo www.countrysideaccess.gov.uk si aad u la xiriiri karto ururada ku deeqa talo-siinta ku saabsan qalabka iyo nabadda, ama la xiriir xarumaha akhbaarta loogu tala-galay booqdaha iyo maktabyada si aad u hesho liis ay ku taxan yihiin kooxaha madaddaalada dibadda lugu sameeyo (outdoor recreation groups).
- Inta aadan bixin saadaasha hawada iska-eeg hana ka cabsan inaad dib u noqotid.
- Waxa baaddiyaha kuu soo jiitaa qayb ahaan waa inaad waxkaste ka dheeraan kartid. Waxaa laga yaabaa in aadan arag qofba saacado dhan, waxaana jira meelo badan oo aan telefoonka gacantu kuugu shaqaynayn, markaas qof kale u sheeg meeshaad tagaysid iyo waqtigaad filanaysid inaad soo laabatid.
- Kala baro caalamadaha iyo summadaha laga isticmaalo baaddiyaha si loo muujiyo dariiqyada iyo baaddiyaha bannaanka ah. Eeg www.countrysideaccess.gov.uk

Ganjeellooyinka iyo hantida dadku leeyahay sidaad ku aragtay ku dhaaf

Fadlan xaq-dhowr dadka ka shaqaysta baaddiyaha iyo hab nololeedka shaqadooda, waayo wax-qabadkeennu waxay wax-yeeli karaan hanti nololeedka



(livelihoods) dadka kale, hiddeheena aan dhaxalnay, iyo amniga iyo nolol-wanaagga xayawaanka iyo kuweenna.

- Caadi ahaan beeralaygu ganjeellada wuu xiraa markuu baxo si uu xooluhu halkaas u joogo, laakiin maraarka qaarkood wuu ka taga isaga oo furan si ay u soo gaari karaan cunnada iyo biyaha. Ganjeellooyinka sidaad ku aragtid ku dhaaf ama calaamadahu waxay kuu sheegayaan samee; haddii aad koox ahaan ku lugaynaysaan, xaqiiji in qofka ugu dambeeyaa uu daayo ganjeellooyinka.
- Haddii aad u malaynaysid inay caalamadi sharci darro tahay ama ay dadka qaldaysa (tusaale ahaan, calaamad odhanaysa 'Khaas weeye - Ma geli Kartid' haddii ay ku taal dariiq dad-weynaha loogu tala-galay), la xiriir dawladda xaafadda.
- Mar dariiqyada dhex maraya dhul ay ka baxdo dalag, marwalba oo aad karaysid.
- Isticmaal ganjeellooyin iyo jaran-jaryo marwalba oo aad karaysid – fuulidda iyo ka dul-talabidda derbiyada, teedaha dhireed iyo deydadu wax-yeello ayay kuwaas u keeni kartaa waxayna kordhini kartaa khatarta ay ku jiraan xoolaha beertu inay ka bax-sadaan.
- Hiddeheena aan dhaxalnay gabigeen ayaa iska-leh – iska-dhowr in aadan qasin burburka iyo dhulka qiimo taariikheed leh.
- Waxii mashiinno iyo xoolo ah iskood ku dhaaf – ha dhexgelin xayawaanka xataa haddii aad u malayso inay dhibaataysan yihiin. Isku-day inaad ogaysiiso beeralayga.

Ilaali geedaha iyo xayawaanka qashinkaagana guriga u qaado

Innaga ayay na dulsaarantahay mas'uuliyadda ilaalinta baaddiyeheena hadda iyo marka la eego facyada mustaqbalka, markaas xaqiijiso in aadan wax-yeello u gaysan xayawaanka, shimbiraha, dhirta ama geedaha.



- Qashinka iyo cuntada hambada ahi khasaare oo kaliya uma gaysato quruxda baaddiyaha, waxay khatar gelin kartaa nolol-duureedka iyo xoolaha beerta waxayna weliba faafisaa cudurada - markaas qashinkaaga guriga u qaado. Inaad qashinka tuurtaa ama daadisaa waa dambiyo sharci darro ah.
- Soo-ogoow quruxda deegaanka daabiciga ah si gaar ahna iskaga ilaali in aadan wax-yeellayn, burburin ama qaadanin waxyaabaha sifo u ahsida dhagaxda, dhirta iyo geedaha. Waxay hoy iyo cunno u yihiin nolol-duureedka, waxayna raacsan yihiin waxyaabaha qofkastaa xiseeyo ee baaddiyaha.
- Xayawaanka duur-joogga ah iyo xoolaha beertu waxay u dhaqmi karaan si aan la-filanayn haddii aad ugu dhawaato, gaar ahaan markay la joogaan kuwooda yar-yar - markaas bannaan badan iyaga iska sii.
- Dabku waxuu u baabi'in karaa nolol-duureedka iyo degaanada sida uu u baabi'iyoo dadka iyo hantida - markaas iska-ilaali in aadan tuurin kabriid ama sigaar shidan waqtikaste oo sanadka dhexdiisa ah. Mararka qaarkood, dab la maamulo ayaa la isticmaala si loo maareeyo dhirta, khaas ahaan dhulka ciidda leh ee aan geedo badan lahayn (heaths) iyo dhulka doog adagi ka baxo (moors) dushood wixii u dhexeeya Oktoobar iyo bilowga Abriil, markaas fadlan ka fiirso in dabku uusan ahayn mid maaraysan inta aadan wacin **999**.

Eyga aad wadatid si adag u ilaali

Baaddiyuhu waa meel ku fiican ciyaarsiinta eyda, laakiin qofka leh ayay waajib ku tahay inuu xaaqiiyo in eygiisu uusan khatar ama dhibaato u keenayn xoolaha beerta, nolol-duureedka ama dadka kale.

- Sharcigu waxuu dhigayaa, inaad ilaalisid eygaaga si uusan u qasin ama uga cabsiin xoolaha beerta ama nolol-duureedka. Waa inaad xarig yar ku haysaa eygaaga marka la joogo ugu badnaan meelaha baaddiyaha ee bannaanka ah



iyo dhulka ballaaran ee lugu nasan karo (common land) wixii u dhexeeya 1da Maarso iyo 31ka Luuliyo, iyo marwalba marka loo dhow yahay xoolo beer.

- Waajib kuguma aha inaad eygaaga xarig ku haysid markaad maraysaan dariiqyada u furan dad-weynaha, waa haddii aad si adag u ilaalinaysid. Laakiin waxaa xeer guud ahaaneed ku noqon karta, inaad eygaaga xarig ku haysid haddii ku kalsoonayn inuu ku addeeco. Sharcigu waxuu beeralayda xaq u siinayaa inay dilaan ey dhaawaca ama dhibaateeya xoolohooda.
- Haddii mid xoolaha beerta ka mid ahi idin soo daba cararo adiga iyo eygaaga, waxaa ammaano ah inaad eygaaga ka furtid xarigga - khatar dhaawac ha gelin intaad is-leedahay isaga ilaali.
- Si gaar isaga ilaali in eygaagu uusan ka cabsiinid idaha iyo naylaha ama uusan war-wareegin meesha dhibaato u keeni karta shimbiraha cushkooda ka samaysta dhulka iyo nolol-duureedka kale – ukunada iyo kuwa yar-yari mar dhow ayay dhiman doonaan haddii ayna waalidkoodka ka helin ilaalis.
- Qofkastaaba waa ogyahay dhibaata saxarada eyda waana ogyahay inay cuduro dhalin karto, markaas weligaaba nadiifi dhulka si masuul ahna u tuur saxaarada eyda. Weliba, xaqiiji inuu eygaaga si joogto ah dixiriyada looga nadiifiyo.
- Waqtiyada qaar, waxaa laga yaabaa in eyada aan loo fasaxin meelaha dhulka bannaanka qaarkood ama in la rabo inay xarig ku xirnaadaan. Fadlan daba raac calaamadaha. Waxaad weliba war dheeraad ah oo ku saabsan qaanuunyadan ka heli kartaa www.countrysideaccess.gov.uk adigoo email u soo diraya openaccess@countryside.gov.uk ama soo wacaya **0845 100 3298**.



Tixgeli dadka kale

Markaad dadka kale qaddarin iyo xaq-dhowr u muujisid waxay taasi baaddiyaha ka dhigtaa deegaan qofkastaaba ku raaxaysto – marka la joogo guriga, shaqada iyo marka firaaqada la yahay.

- Marka uu socodka baabuurta aad ugu bato waddooyinka yaryar ee baaddiyaha taasi waxay u xuntahay ooyna khatar ku tahay dadka degan dhulka, booqdayaasha iyo nolol-duureedka – markaas aayar baabuurka u wad, markaad kartidna, baabuurkaaga guriga kaga tag, ka feker inaad baabuurada wadaagtaan (sharing lifts), isticmaalna noocyada kale ee gaadiidka sida gaadiidka dad-weynahu wada isticmaalo ama baskiilka. Si aad u hesho macluumaadka gaadiidka dad-weynaha, soo wac khadka safarka Traveline lambarkuna waa **0870 608 2608** ama u soo booqo www.countrysideaccess.gov.uk si aad u hesho dadkaad la xiriiri kartid.
- Xaq-dhowr baahooyinka ay qabaan dadka dhulka degan – tusaale ahaan, ha ku xirin baabuurkaaga waddooyinka irridaha, dariiqyada-khaas ah ama meelaha kale ee laga galo.
- U bane marka xoolaha la soo ururinayo ama meel kale loo wareejinayo samee wixi beeralaygu uu ku yiraahdo.
- Markaad fuushantahay baaskiil ama aad wadatid baabuur, si qunyar u soco fardo, dad lugaynaya iyo xoolaha awgood si ballaaran ugu bane. Sharciga ayaa dhigaya in dadka baaskiil saarani ay u baneeyaan dadka lugaynaya iyo dadka fardaha saaran.
- Taageero sii dhaqaalaha baaddiyaha – tusaale ahaan, raashinkaaga ka soo gado dukaanada dhulkaad joogto.



Macluumaadka dad-weynaha loogu tala-galay

Si aad u hesho macluumaad ku saabsan xuquuqda cusub ee gelidda, booqo

www.countrysideaccess.gov.uk email u soo dir

openaccess@countryside.gov.uk ama soo wac **0845 100 3298**.

Si aad u heshid maabyada iyo macluumaadka ku saabsan meelaha dheeraadka ah ee aad faras ama lug ku mari kartid qaybaha dhawris gaar ah lugu ilaaliyo

dhexdooda, u soo booqo shabakada www.countrywalks.defra.gov.uk

Haddii dhibaato kaa soo gaarto gaaridda meelo gaar ah amaba xuquuqda aad u leedahay inaad waddo martid, la xiriir Waaxda Baaddiyaha ama Xuquuqda

Dariiqyada (Countryside or Rights of Way Department) ee dawladda xaafadda aad joogto, ama dawladda Beerta Qaran (National Park authority) si ay kuu caawiyaan.

Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sidaad baaddiyaha

Scotland u tagi kartid iyo Shuruucda Dibad Tagidda ee Scotland (Scottish Outdoor Access Code), u soo booqo shabakada Dhaxalka Dabiiciga ah ee Scotland (Scottish Natural Heritage) oo ah www.snh.org.uk/soac

Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sidaad baaddiyaha Wales u tagi kartid ama Shuruucda Baaddiyaha Wales (Wales Countryside Code), u soo booqo www.ccw.gov.uk

Shuruucda Baaddiyaha – talo-siinta loogu tala-galay maamulayaasha dhulka

Dadka u booqanaya baaddiyuhu dakhli muhiim ah ayay soo geliyaan dhaqaalaha dhulka. Ugu badnaantood waxay jecelyihiin inay qaataan waddo si cad u muuqata, inay isticmaalaan meelaha sida habboon loo mari karo sida ganjeellooyinka, waxayna guud ahaan rabaan inay samayaan waxa saxda ah – laakiin waxay idiinka baahan yihiin inaad caawisaan.



Ogoow xuquuqdaada, masuuliyaddaada iyo waxyaabaha aad u qoolan tahay

- Halkee ayay dadku mari karaan dhulkaaga markay marayaan?
- Maxay yihiin qaanuunyada ay tahay inay dadku adeegsadaan intay marayaan dhulkaaga?
- Maxay yihiin xuquuqdaada iyo masuuliyadda kaa saaran dadka kale ee dhulkaaga jooga?

U fududee booqdayaasha inay si masuul ah u dhaqmaan

- Sideed dadka uga caawin kartaa inay dhulkaaga si masuul ah ugu soo galaan oonay Shuruucaha Baaddiyaha u tixgeliyaan?
- Maxay yihiin caawimada iyo talada aad heli kartaa?

Soo-ogooow waxii khatar gelin kara amniga booqdayaasha

- Miyay jiraan waxyaabo khatar u ah amniga dadka jooga dhulkaaga, sideed wax uga qaban kartaana waxyaabahan khatarta ah?

Ogoow xuquuqdaada, masuuliyaddaada iyo waxyaabaha aad u qoolan tahay

- Booqdayaashu si kala duwan ayaa loogu fasaxaa inay galaan dhulka. Si aad u heshid hagid ku saabsan siday tani kuu saamaynayso iyo wixii ah xuquuqdaada, masuuliyaddaada iyo waxyaabaha aad u qoolan tahay, la xiriir dawladdaada hoose ama dawladda Beerta Qaran, u soo booqo qaybta loogu tala-galay maamulayaasha dhulka ee shabakada www.countrysideaccess.gov.uk Maababka 1:25,000 ee Sahaminta Dhulka ee Dowladda Ingriiska (The Ordnance Survey) ayaa muujinaya dariiqyada dad-weynuhu uu xaq u leeyahay inay maraan iyo meelaha xaddidan ee



dhulka bannaanka ah. Maababkani guud-ahaan waa lugu kalsoonaan karaa laakiin ma aha 'kama dambays', markaas waxaad u baahan doontaa inaad dawladdaada hoose ka fiiriso heerka sharci-ahaaneed ee Xuquuqda Dariiqyada. Waxaad ogaan kartaa maabka meelaha dhulka la mari karo ah marka la adeegsado 'Sharciiga sanadkii 2000 ee ku saabsan Baaddiyaha iyo Xuquuqda Dariiqyada' (Countryside and Rights of Way Act 2000) haddii aad booqato www.countrysideaccess.gov.uk

- Sharci ahaan waa in aad dariiqyada xaq loo leeyahay in la maro bannaysaa oo aadan xirin jiridda ay dadku u maraan dhulka u furan – waa dambi sharci-darro inaad isticmaashid calaamado dadka qaldaya taas oo aad rabtid inaad dad-weynaha ka niyad-jebisid xaqa ay u leeyihiin dhulka u furan.
- Badanaa markay dadku si sharci-darro ah u galaan dhulka dad kale leeyahay uma kasaan – eeg qaybta 'Xaashada Talo-siinta ku saabsan Maamulka Dadka Soo-geliddooda' (Managing Public Access Advice Sheets) ee ku taal www.countrysideaccess.gov.uk si aad u heshid talo-siin ku saabsan sida wax looga qaban karo gelidda sharci-darro ah. Haddii kalena, ka codso nuqul Xarunta Xiriirka Gelidda Qofwalba u furan lambarku waa **0845 100 3298**.

U fududee booqdayaasha inay si masuul ah u dhaqmaan

- Waxaa kaa caawin karta maamulka gelidda dhulkaaga, hagaajinta dariiqyada, xuduudaha, sumadaha, calaamadaha, ganjeelloyinka iyo jaran-jaryada.
- Marka jidka dad-weynaha u furan u dhex-marayo meel xaddidan, sida deyd ama teed dhireed, bannaan yar ka fur haddii aad karaysid. Haddii ayna tani soconayn, isticmaal ganjeello la mari karo ama, haddii ay lagama-maarmaan noqoto, jaran-jaro. Markaad rakibaysid ganjeellooyin iyo jaran-jaryo cusub, iska-hubso inay dawladda xaafaddaadu kuu fasaxday.
- Dhiirri-geli inay dadku xaq-dhowraan waxaad ka rabtid adigoo ka muujinaya hagid cad oona edeb leh halkaad uga baahatid. Tusaale ahaan, haddii aad



booqdayaasha wax uga sheegtid hawl-fulinta maamulka dhulkaaga waxay taasi ka caawin kartaa inay kuu baneeyaan.

- Qashin waxuu joo jiita qashin kale – markaad si habboon uga takhalustid waxyaabaha ay ka mid yihiin qashinka beerta, waxaad iska-ilaalin doontaa in qashinka si sharci-darro ah la isaga-tuuro waxaanad sidaas ku dhiirri-gelin doontaa dadka kale inay qashinkooda uga takhalusaan si masuul ah.

Soo-ogoow waxii khatar gelin kara amniga booqdayaasha

- Marka la eego Sharciyadii 1957 iyo 1984 ee ka hadlaya Waxyaabaha ay Dadka meel degani u qoolan yihiin waajibkaaga daryeel waxuu ku xiran yahay nooca xaqa gelidda – markaas waxaa muhiim ah inaad ogaatid waxii xuquuq ah, haddii ayba jiraan, ee khuseeya dhulkaaga. La xiriir Ururka Dhulka iyo Ganacsiga Baaddiyaha (Country Land and Business Association) lambarkoodu waa **020 7235 0511** ama Uruka Beeralayda ee Qarameed (National Farmer's Union) lambarkooduna waa **0870 845 8458** si aad u hesho hagid intaas dhaafsan.
- Tixgelin sii wixii halis ah ee dabiiciga ah ama dad-sameeyay ee ku yaal dhulkaaga wixii khatar ahna dadka si cad ugu tilmaam haddii aanay si cad u muuqan.
- Meelaha dadku booqdo ha ku ag isticmaalin deydyo koronto ku shaqeeya iyo waxyaabaha kale ee halis ah, khaas ahaan dariiqyada ciriiriga ah dushooda iyo meel la siman dhararka ilmaha. Waxaa si xog leh lagugu la talinayaa inaad isticmaasho silig siman oo saafi ah halkaad ka isticmaali lahay silig soo taag-taagan.
- Xoolaha laga yaabo inay weeraraan booqdayaasha waa in aan si furan loogu sii dayn meelaha dad-weynuhu ay maraan - waa lugugu qabsan karaa wixii wax-yeello ah ee ka dhalata.



Macluumaadka loogu tala-galay maamulayaasha dhulka

Si aad u heshid Xaashadaha Talo-siinta ku saabsan Maamulka Dadka Soogeliddooda, u soo booqo qaybta loogu tala-galay maamulayaasha dhulka ee shabakada www.countrysideaccess.gov.uk ama la xiriir Xarunta Xiriirka Gelidda Qof walba u furan lambarkoodu waa

0845 100 3298.

Si aad u hesho maabyo iyo macluumaad ku saabsan xuquuqda gelidda marka la eego Sharciga ka hadlaya Baaddiyaha iyo Xuquuqda Dariiqyada, booqo qaybta maamulayaasha dhulka ee shabaka www.openaccess.gov.uk ama Xarunta Xiriirka Gelidda Qofwalba u furan ka wac **0845 100 3298.**

Wixii dhibaatooyin ah ee kaa soo gaara meelha gaarka ah ama xuquuqda dariiq, la xiriir Waaxda Baaddiyaha ama Xuquuqda Dariiqyada ee dawlaaddaada hoose, amaba dawladda habboon ee Beerta Qaran si ay kuu caawiyaan; eeg www.countrysideaccess.gov.uk ama buugga telefoonada ee xaafaddaada si aad u ogaato halkay ku taxan yihiin.